

Wasaaradda Bayer qaabishan Degaanka iyo ilaalinta Macaamiisha



Macluumaad loogu talagaley Muslimiinta Xeerka kyaal Bayer ee Gowraca Xoolaha Waqtiga Ciidda

- Waa mamnuuc in lagu gawraco Xoolaha Guriga ama Banaanka.
- Waxaa la ogolyahay kaliya inaad Xoolaha ku qaado Gaari loogu talagaley (sida Isjiidka). In lagu qaado Xoolaha Gaariga Gadaal Qaybta Shandaha waa mamnuuc.
- Ula dhaqan Xoolaha si taxadir ah. Haka jiidin Tinta; haku kor fariisan Xoolaha, Haka qaban ama haisku xirin Lugaha, ama waxyaalo lamid ah. Xoolaha Kaliyah gaarimaayaan Dhibaato haddii aad sida uladhaqanto, xattaa qiimaha Hilibka ayaa ka xumaanayao
- Xeerka Xoolaha waxuu yahay in Xoolaha lagowrici karo kaliya marki **lasuuxiyo**. Waa mamnuuc inuu Dhiigbaxo Xoola aan lasuuxin (Gawraca). Xaalado gaar ah kaliya ayay ogolaash idin sii kartaa Hayada qaabishan.
- Waxaa lagu ogaalan karaa kaliya inaad adiga Neefka Dhiigbixiso, haddii aad wax Caddayn ah u heesatid inaad Shaqadaa taqaanid. Macluumaad ku saabsan Arrintaa waxaad kaheli kartaa Xafiiska Qaabishan Vetinireeka.
- Ama Neefka marki uu Dhiigbaxyo ayaad lajoogin kartaa oo Gacanta Neefka dusdhiisa kasaari kartaa oo duceensankartaa, marki uu Qof Shaqadaa yaqaanno gowracayo Neefka
- **Muhim gawraca sida uu u Dhiigbaxo Neefka:** Gawrac zaa'id ah, Qoorta Neefka inkor loo jiido ilaa uu kajabo Qoorta waa mamnuuc. Madaxa waxaa laga goyn karaa kaliya Neefka marki uu dhinto.
- Waxaad Suuqqa lagu qalo Xoolaha soo geli kartaa kaliya marki aad laheshiiso Qolada iskaleh Suuqqa Xoolaha, muhim waxaa ah, **Dharka Daafaca** (Sida Dhar markaliya laqaadanayo) iyo inaad **Gacmaha nadiifiso oo aad isticmaasho Daawada Infakshinka iyo Kabaha nadiifiso**. Haddii lagu ogolaado inaad ka qaybqaadato jarjaridda Neefka, waa inaad **Macluumaadka Sharciga daafaca Infakshinka** la socotaa taasi waa muhim. Taasi waxaa qaabishan Xafiiska Caafimaadka ee Degmeda aad degentahay.
- waa **Qasab in Neefka la gawracayo iyo Hilibka inla baaro**. Dhakhtarka Xoolaha ayaa baarayaa, inuu Neefka caafimaad qabo iyo in Qayb/Xubnaha, ey tahey in laga saaro oo Qasab noqoto in la tuuro. In la cuni karo Hilibka waxaa caddaynayo Shaabad leh Kalarka Raashinka. Markaa kadib ayaad qaadan kartaa Hilibka.
- Qaar kamid ah Hilibka iyo Xubnaha (Kuwa Khatarta ah) lama ogola inaad qaadatid, Shirkadda ayaa hagaajineyso. Kuwaasi waxey yihiin Xameetiga iyo qaarka ugu dambeeyo Caliisha yer (lieum) ee Idaha iyo Arriga D'a gasta ey jiraan. Lo'da ka wayn 12 Bilood, Idaha iyo Arriga waxaa kamid ah Madaxa, Maskaxda iyo Indhaha'
- Caloosha Neefka waa qaadan kartaa, kadib marki ey Shirkadda meyriso oo nadiifiso. Madaxa waxaa qaadan kartaa haddii uu Neefka jiro ugu badnaan 12 Bilood oo Maqaarka laga qaadey
- Soo qaado Alaab ku haboon in lagu qaado Hilibka, sida Santuuq Naddif ah oo Caag kasameysan. Kuleylaha waxaa idinku waanineyaa. Santuuqa Qaboojiska
- Haddii aad Su'alo qabtid ama Macluumaad Darisyaasha iyo Wayxbaridda u baahatid, waxaad la xariiri kartaa Xafiiska Vetirineerka (Maamulka Dawladda ama Xafiiska Degmeda)

La qorey 28.06.2016